


www.somalilandbiodiversity.org I June 2019 I Tirsiga 6aad

Ogaalka kala duwanaanshaha Noolaha Soomaalilaan oo Kordhay……………………….1
Noolaha muuqaalkan…………………………….1
Jaadad ku soo biiray noolihii hore ee Soomaalilaan lagu yaqaannay…………………2
Walaaleeye: Goob ku Hodan ah kala duwanaanshaha dhirta…………………………..3
Somaliland ma laga heli karaa *Vernonia mogadoxensis*?.........................................4
Raadintii *Aloe Parvidens*………………………….5
*Xoolo-naaxiye* (*Leucaena leucocephala*)…..6
Booqasho daraasadeeddii Carwada Qaran ee Nayroobi…………………………………………………..7
Wararka xarunta………………………………..;…..8

## Noolaha Muuqaalkan:
### *Pachnoda iskuulka*




Doorshaankan quruxda badan ee idiin muuqda waxa 2019-kii sharaxay David Kral iyo kooxdiisa oo 2018-kii muunado ka soo ururiyey waqooyiga-bari Soomaalilaan. Waa noocii ugu horreeyey 'Pachnoda' ee Soomaalilaand laga helo. Se waxa jira jaadad kale oo jooga laakiin midna uma eega.

Eeg bogga 5aad

## Ogaalka kala duwanaanshaha Noolaha Soomaalilaan oo Kordhay

Sannadkan 15 noole oo cusub ayaa Soomaalilaan lagu ogaaday; 8 Dibqallooc (Hangaralle), 5 geed, 1 mas ah, iyo 1 cayayaan ah. Magacyadooda waxa lagu taxay bogga 2-aad iyada oo lingaxa tixraaca xogtu la socdo. 12 ka mid ahi waa nooc cusub, taas oo ka dhigan in aan dunida sayniska hore loogu aqoon 2018 ka hor. Labada kale waxa markii ugu horreysey la diiwaan geliyey in Soomaalilaan laga helo sannadkii 2018. Dhanka dhirta dadka deegaanku waxa ay ogaayeen in ay goonni yihiin, si ka duwan dibqallooca iyo cayayaanka. Cilmi baadhisaha tibaaxaya noolaha 'cusub' ma sahlana in la akhriyaa waayo dadka takhasuska leh oo qudha ayey u saamaxaan in ay kala soocaan noocyada cusub iyo kuwii hore dunida looga yaqaannay.

Maxay magacyada sayniska ee nooleyaasha iyo dhirtu muhiim u yihiin? Sababta koowaad waa in suurtogal laga dhigo in ay macluumaad wadaagaan dadka dunidu. Magacyada waxa looga baahan yahay in dadka looga warramo 'noole' iyo doorkiisa bay'ada, iyo in laga jawaabo weydiimaha sida muxuu taraa? Muxuu u baahan yahay si uu u noolaado? Sida uu u saameeyo xasiloonida bay'ada iyo nolosha bani'aadamka? Way fududdahay in isha laga laliyo xayawaanka iyo dhirta yaryar ee innagu hareeraysan, laakiin waxa ay noqon karaan kuwo muhiimad u leh wanaajinta carrada, faxlidda, iyo xakamaynta noolaha kale ee aan la jeclayn.

Nasiib darro, awoodda ah in la daraasadeeyo xayawaanka Soomaalilaan waxa khatar ku ah kuwa u turjumaya xeerka xakamaynta urursiga xayawaanka Soomaalilaan sidii oo uu yahay mid mamnuucaya xitaa daraasadaha cilmiga ah ee ay oggolaadeen Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta reer Miyiga iyo hay'adaha wax barashada ee Soomaalilaand. Taas oo keentay in mar horeba ay saynisyahanno caan ahi ka noqdaan qorshahoodii ahaa in ay Soomaalilaan ka hawl galaan, arrinkaas oo sababi kara in ay hoos u dhacdo fursaddii dadka reer soomaalilaan ay dadkaas wax kaga baran lahaayeen. Taasi waa masiibo.

Aqoon la'aantu wax ma ilaaliso. Ma joojin karto fiditanka degsiimooyinka, ma na dhimi karto culayska daaqsinka, labadaas oo sababa dhimashada xayawaanka. Waxa ay Soomaalilaan ka hor istaagaysaa uun in ay bartaan kala duwanaanshaha xayawaanka dalkooda iyo weliba in ay hay'adaha aqoonta Soomaalilaan awoodi waayaan in ay baraan ardaydooda noocyo muhiim ah oo xayawaan ah iyo la falgalkooda dhirta. Waxa ay niyad jebin kartaa hay'ado maalgelineed in ay caawiyaan hawlaha la xidhiidha aqoontaas. Waxa ay si taban u saamayn kartaa horumarka dhanka dalxiiska ee la xidhiidha bay'ada waayo xogtu waxa ay ku xaddidnaan kartaa oo qudha xayawaannada waaweyn ee shaqadooda lagula socon karo kamaradaha. Waxa jira wax badan oo laga baran karo kamaradaha iyo muuqaallada fiidiyawyada, laakiin si loo ogaado xayawaanka badan ee aan weli la daraasadayn, waxa muhiim ah barnaamijyo aqooneed oo xooggan. Somaliland Biodiversity Foundation waxa loo aasaasay in uu arrintaa badhitaaro sidii loo fulin lahaa. Haddii ay taasi suuragal noqon waydo waxa markaa imanaysa in yoolkiisii dib loogu noqdo.

# Jaadad Ku Soo Biiray Noolihii Hore Ee Soomaalilaan Lagu Yaqaannay

*Mary E. Barkworth*

| Noolaha | Magaca | Halka lagu daabacay | | Noolaha | Magaca | Halka lagu daabacay |
|---|---|---|---|---|---|---|
| Dib-qallooc | *Neobuthus amoudensis* (new species) | Euscorpius. 2018. No. 271 Open access | | Xaar wal-waal | *Pachnoda iskuulka* (new species) | Zootaxa. 2019. 4604 (3): 482–496 |
| Dib-qallooc | *Neobuthus erigavensis* (new species) | Euscorpius. 2018. No. 271 Open access | | Mas | *Telescopus pulcher* (first reco | Zootaxa. 2018. 4462 (4): 483–496 |
| Dib-qallooc | *Neobuthus factorio* (new species) | Euscorpius. 2018. No. 271 Open access | | Geed | *Aloe sanguinalis* (new species) | Phytokeys. 2019. 117:85 –97. Open access. |
| Dib-qallooc | *Neobuthis gubanensis* (new species) | Euscorpius. 2018. No. 271 Open access | | Geed | *Boswellia occulta* (new species) | Phytotaxa. 2019. 394 (3): 219–224. PDF file from authors |
| Dib-qallooc | *Neobuthus maidensis* (new species) | Euscorpius. 2018. No. 271 Open access | | Geed | *Cylindropuntia intricata* (First documentation) | OpenHerbarium.org. 2018. |
| Dib-qallooc | *Neobuthus montanus* (new species) | Euscorpius. 2018. No. 271 Open access | | Geed | *Opuntia microdasys* (First documentation) | OpenHerbarium.org. 2018. HARG000263. |
| Dib-qallooc | *Pandinurus fulvipes* (new species) | Euscorpius. 2019. No. 275 Open access | | Geed | *Opuntia stricta* var. *stricta* (First documentation) | OpenHerbarium.org. 2018. HARG000266 |
| Dib-qallooc | *Barbarurus feti* (new species) | Euscorpius. 2019, No. 280 Open access | | Geed | *Opuntia stricta* var. *dillenii* (First documentation) | OpenHerbarium.org. 2018. HARG000267 |

Shaxda sare waxa lagu taxay noocyo la sifeeyey, la daahfuray ama loo diiwaan geliyey Soomaalilaan illaa bilawgii 2018. Sifaynta jaadadkan cusub ma aha wax fudud waayo marka koowaad waa in la hubiyaa jaadadkii hore loo sifeeyey marka xigtana waa in la bixiyaa sharax saamaxaya in jaadkan cusub uu ka duwan yahay kuwii hore ee la yaqaannay. Raac lingaxan si aad tusaaleyaal u aragtid.

Diiwaangelinta nooleyaasha jira waxa ay u baahan tahay in la keeno daliillo la caddayn karo iyo muunado. Iyada oo ku xidhan hadba noolaha laga hadlayo waxa muhiim ah in la hayo muunad, sawir/muuqaal muujin kara astaamaha jaadkaas, unugyo ama muunado DNA ah, ama dhammaantood, iyo in la hayo xogta goobta noolaha laga heley. Muhiimaddu waa in diiwaanka la xaqiijin karo.

Xagga dhirta, muunadaha si fiican loo ururiyey waa kuwa ugu fiican ee la diiwaangelin karo, sidoo kale sawiro kala saari kara jaadadka. Muunadaha lagu sii daray sawirradu waa kuwa ugu fiican waayo unugyo ayaa laga soo qaadi karaa noolaha sidoo kale muuqaalka sawirkana waxa lagu baahin karaa degellada.

Muuqaalka hoose waa sawir diiwaan ah oo muujinaya helitaanka *Cylindropuntia intricata* ee Hargeysa. Waxa arkay Axmed Ibraahin Cawaale waxa sawirtay Helen Pickering waxa aqoonsaday Lucas Majure.



# Walaaleeye: Goob Ku Hodan Ah  Kala Duwanaanshaha Dhirta

*Maxamed M. Mire*

Waxa farxad ii ahayd in aan la kulmay Dr. Cabdullaahi Xaaji Maxamuud, digtoor caafimaad oo sidoo kalena ah nin niyad u haya ilaalinta deegaanka. Wuxu ku adkaystay in uu i geeyo dhul qoyskiisu leeyahay oo ah 20 higtar oo ku yaalla meesha la yidhaa 'Dooxada Faramara' oo ah meel qiyaas ahaan 5 kilomitir waqooyi kaga beegan magaalada Caynabo oo ku taalla Galbeedka gobolka Sool. Dhulka waxa 1948-dii la siiyey aabbihii. Wax ka yar hal higtar waa la beeray; inta kale waxa daaqa waxoogaa lo' ah.

Sida dooxooyinka kale ee Nugaal, Dooxada Faramara waxa ay heshaa biyo ka soo rogmada taagagga ku hareeraysan, sidaa darteed waxa ka dul baxa dhir aad u kala duwan. Sidoo kale, maadaama oo aan aad loo daaqin, waxa ay yeelataa dhir badan oo kuwa cimriga dheer ah oo aad u kala jaad duwan, waxana  lagu tilmaami karo dhul aad u dabiici ah. Goobtani waa mid ka mid ah meelaha kooban ee sii nool, ee ka baxsan buuraha Golis, ee weli dhirtu sii caafimaadka qabto. Meelaha ka ag dhadhaw ee aan sida fiican loo maamulin dhirtu way ka madhatay ama waxa ka baxay jaadad aan daaqsinka ku fiicnayn. Waxa intaa dheer dhirta sida *Andropogon kelleri* (Duur), oo ka madhay meelo badan oo ay asal ahaan ka bixi jireen ayaa si aad ah uga baxa goobta. Waxa ay tilmaamaysaa faa'idooyinka ay leedahay hirgelinta habboon ee maamulka dhul daaqsimeedka dooxadan oo kale ah.

Jaadadka caadiga ah ee sida fiican u muuqda ee aan halkaa ku arkay waxa ka mid ah: *Andropogon kelleri* (Duur), *Paspalidium desertorum* (Gargaro), *Heteropogon con-tortus* (Ayaxmakare), *Cynodon dactylon* (Doomaar), *Cenchrus ciliaris* (Ciirdhuuq), *Cordia monoica* (Madheed), *Grewia villosa* (Gomashaa), *Grewia tenax* (Dhafaruur), other *Grewia* species *(Hohob)*, *Boscia minimifolia* (Maygaag), *Dalbergia commiphoroides* (Duyac), *Glossonema re-voilii* (Askax), *Senna alexan-drina* (Jaleelo Geel), *Aerva javanica* (Soonah), *Ocimum* sp. (Reexaan) and *Vachellia tortilis* (Qudhac).

Goobtu waa meel daraasado badan ay ka samayn karaan dadka bay'adda bartay, dhiryaqaannada, iyo saynisyahannada deegaanku. Waxa loo isticmaali karaa in ay noqoto goob tusaale u noqota daaqsinka habboon oo ay talooyinka ka qaadan karaan kuwa horumarinta iyo maamulka dhul daaqsimeedyadu. Waxa kale oo loo isticmaali karaa sahminta faa'idooyinka dhaqaale ee  isticmaalka kala duwan ee dhulka sida kala duwanaanta beerashada iyo daaqsimeedka. Iyada oo weliba goobta loo isticmaali karo goob lagu daryeelo noolaha kala duwan ee dabiiciga ah iyo goob laga helo siidhka lagu sii tarmin karo barnaamijyada horumarinta dhul daaqsimeedka. Ta ugu sii muhiimsanina waa in Dr. Cabdullaahi uu diyaar u yahay in uu goobta u furo cid kasta oo danaynaysa in ay hir geliyaan daraasaadka noocan ah.

## Saddex ka Mid ah Dhirta Walaaleeye Caanka ka ah.



*Heteropogon contortus* (Avaxmakare)
CC-BY-SA Harry Rose



*Cynodon dactylon* (Doomaar)
CC-BY-SA Юкатан



*Senna alexandrina*
CC-BY-SA  Lalithamba


Sawiradan sare waxa laga soo qaaday Wikimedia. Lingaxyada ka hooseeyana waxa laga soo qaaday Web-ka. Waxa taa saamaxaya oggolaanshaha summaddiisu tahay CC-BY-SA, oo la macne ah in la tarmin karo ama la isticmaali karo illaa inta mulkiilaha la xusayo.

# Somaliland Ma Laga Heli Karaa *Vernonia Mogadoxensis*?

Farxaan Furre

Dhawaan waxa aan ka codsaday SBF in ay i ammaanaysiiyaan qalab aan ku soo guro geedka *Vernonia mogadoxensis.* Marka aan tixraacno buugga *Flora of Somalia,* geedkani wuxu leeyahay saddex magac Soomaali "Gagabo", "Goggobo", or "Gaggabot". Xiddidadiisa waxa loo isticmaalaa in lagu daweeyo geela iyo riyaha. Ujeeddadaydu waa in aan hubiyo in caleemaha dawo ahaan loo isticmaali karo halkii xididdada laga isticmaali lahaa waayo caleemaha isticmaalkooda ayaa ka dhib yar isticmaalka xididdada. Jaadkan waxa aad loogu yaqaannaa meelaha muqdisho u dhaw, taagag qiyaas ahaan ah 340 m ka sarreeya joogga badda, laakiin waxa sidoo kale lagu arkay, ama mid u eegba, Burco meelo taag ahaan ah 1067 m, sida uu xusay Capt. F.E. Peck in 1941.

Waxa aan weydiiyey Axmed Siciid, oo ah digtoor caafimaadka xoolaha ah oo Burco deggen, dhirtana xiiseeya, in uu geedkan garanayo, aniga oo isticmaalaya magaca soomaaliga ah, wuxu ii sheegay in uu garanayo oo uu iga caawin karo helitaankiisa. Deetana Axmed I Cawaale (SBF) ayaa caqabad iman karta nala wadaaagay. Jaad kale oo la yidhaahdo, *Iphionopsis rotundifolia,* ayey aad iskugu dhaw yihiin dhanka magac soomaaliga: "Gagabood", Axmed wuxu soo jeediyey in labada geedba muunad laga soo qaado si khubaradu hadhaw u kala saarto. Taas oo caawinaysa in aan daraasaddayda u heley jaadkii saxda ahaa.


Herbarium specimen from Nairobi National museum

Dad kale oo xog muhiim ah ku darsaday, Mutuku Musili, madaxa qaybta aqoonta dhirta ee madxafka qaran ee Nayroobi ayaa soo diray muuqaallo ah muunadda geedkan *Vernonia mogadoxensis* oo Koonfurta Soomaaliya laga keenay. Helen Pickering waxa ay soo dirtay sawirro la xidhiidha muunadda geedka waxa ay sidoo kale nagu xidhay Henk Beentje oo qoray qaab dhaqanka geedkan. Henk waxa uu ka faallooday in maadaama oo ay labada jaad aad iskugu eeg yihiin in aanu la yaabin in magacyadooda Soomaaliga ahi isku dhaw yihiin. Wuxu se sheegay kala duwanaantooda: "dhuunta qaybta dheddig ee *Vernonia* way dhuuban tahay waana taagan tahay, iyada oo xagga sare u fiiqan;…halka geedka *Iphionopsis* dhuunta dhedig ay filiqsan tahay isla markaana ay xagga sare u buuran tahay".

Aniga oo ku hubaysan xogtaas iyo qalabkaas, ayaanu is raacnay Axmed Siciid, bishii May si aanu labada jaadba uga soo raadinno agagaarka Burco. Waxa aanu helnay nooc ka mid ah labada jaad oo aan markaa ubax lahayn iyo jaadka kale oo ubax leh. Waayo suuro gal ma aha in la aqoonsado geed aan ubax lahayn, sidaa darteed waxa aanu muunad ka soo qaadnay oo sawirnay geedkii ubaxa lahaa.


Flowering head

Markii aanu u fiirsannay qaybta dheddig ee geedka waxa ay aad ugu dhawayd in uu geedku yahay *Iphionopsis rotundifolia* ee aanu ahayn kii kale ee *Vernonia mogadoxensis. Iphionopsis rotundifolia* wuu ka baahsan yahay *V. mogadoxensis* waxana lagu yaqaan in uu ka baxo meelaha taag ahaan u dhexeeya 60-1050 m. waxa kale oo macquul ah in aanay labada jaad midna ahayn. Muunadda aanu qaadno ayaa hubin ugu dhaw. Kan aan ubaxa lahayn wuxu noqon karaa *Vernonia mogadoxensis*, laakiin waa in aanu helno isaga oo ubax leh si aanu u hubinno. Waxa aynu sugaynaa waxa ay khubaradu ka yidhaahdaan marka ay eegaan.

Axmed I Cawaale ayaa sidoo kale ogaaday in muunadda ay ku ag qoran tahay qoraal soo jeedinaya in la barbar dhigo muunad kale (*Barbier 1052*) oo laga soo qaaday Caluula oo u dhaw geeska Garduufi, ee Buntlaand. Waxa ay u muuqataa in goobtaasi ugu dhaw dahay *V. mogadoxensis* marka loo eego Burco. Markaa imika waxa jira muunado kale oo dib loo eegi karo iyo koox kale oo la heli karo.

Maxaa xiga? *Vernonia mogadoxensis* ayaa ahayd barta yoolka ee mawduuca qoraalkayga jaamacadeed, laakiin maadaama iyada iyo *Iphionopis rotundifolia* isku si loogu isticmaalo dawaynta xoolaha, waxa aan baadhi doonaa jaadkaas ka baxa Burco agteeda. Ujeeddadaydu waa in la helo dawo jaban oo deegaanka u wanaagsan oo xanuunka 'Mangaha' lagaga dawayn karo Geela iyo Riyahaba. Isticmaalka xididka geedku wuxu keeni karaa dabargo' geedka ku yimaadda. Isticmaalka caleenta ayaa uga dhib yar waxana ay keeni kartaa in geedka la beero.

Haddii ay dawadu tahay xididka oo qudha deetana waa in aynu ogaanno inta ugu yar ee xidid ah ee geedka laga goyn karo si aan geedku u dhiman. Laba gooraalaba, waxa aynu u baahannahay in aynu ogaanno nooca geedka muhiimka ah si macluumaadku uu ugu faa'ideeyo dadka gobolka ku nool. Sababtaas bay tallaabada koowaad ee daraasaddaydu u ahayd in aan horta soo qaato qalabka dhir ururinta. Waxa aan u mahad celinayaa dhammaan dadkii iga caawiyey wajigan la xidhiidha daraasaddayda.

# Raadintii *Aloe Parvidens*

*Mary E. Barkworth*

Xarunta aqoonta dhirta bariga Afrika ee ku taalla duugaal-dhigga Qaranka Kiiniya, waxa yaalla muunado badan oo laga ururiyey Soomaalilaan xilligii maxmiyaddii Ingiriiska. Mid kuwaas ka mid ah ayaa indhaha Faysal soo jiitay, waayo wuxu garanayey goobta laga qaaday oo ah agagaarka tuulada Raybadka, koonfurta Hargeysa. Muunaddaas, oo loo aqoonsaday '*Aloe pirrottae*', waxa la qaaday Oktoobar 19, 1954-kii. Waxa aanu baadhnay buugga *Flora of Somalia* waxana aanu helnay in magaca geedkaas Soomaalilaan ka baxa uu yahay *Aloe parvidens*. *Aloe pirrottae* wuu ka ballaadhan yahay waana uu ka ilko dheer yahay (3.5-5 mm ka kalena 1-2.5 mm) kana liidad badan yahay, waxana laga helaa oo qudha Itoobiya iyo waqooyiga Kiiniya.



Aloe parvidens growing in the protection of a shrub.

March 4, 2019, Faysal iyo aniga ayaa u baxnay si aanu u soo eegno in *Aloe parvidens* weli la heli karo. Waanu helnay! Geedku ma faraxsanayn, laakiin wuu noolaa, wuu ka noolaa abaarihii darnaa ee dhulka soo maray sannadihii is xigay. Hareerihiisa ayaanu eeg-eegnay oo waxanu helnay dhawr kale oo ka ag baxay. Waxa ay ka hoos baxeen ama ka ag dhawaayeen dhir waaweyn oo aad loo daaqay. Caleemaha geedku waa bunni leh calaamado ballaadhan oo cadcad, iyo ilko fiiqan oo yaryar oo cadcad oo dhinacyada ah.

Dadka deegaanka ayaanu weydiinnay geedka, laakiin wax dareen ah uma ay haynin, iyaga oo Faysal u sheegay in aan xoolahoodu cunin. Dhirtaa waaweyn ee ay ka hoos baxeen ayaa markaa ka difaacay in aan la jiidhjiidhin mar haddaan la cunayn.

Mar haddii dhawr geed ay ahaayeen, waxa aanu soo qaadnay



*Aloe parvidens* showing underground stem.
Imaged 2019-Apr-05

laba ka mid ah, mid ka mid ah waxanu ku beernay xarunta kala duwanaanshaha noolaha ee Jaamacadda Hargeysa, midka kalena wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Miyiga. Markii aanu qodaynay waxa aanu ogaannay in nooca dacartan oo u muuqata in aanay jirrid lahayn ay jirrid leedahay laakiin ay carrada ka hooseyso.

May 27, geedkii aanu ka beernay xaruntu wuxu diyaarinayey ubax. Si ka duwan dhirta cidlada ka baxda, geedkan si joogto ah ayaa loo waraabinayey.

Waxa la diiwaan geliyaa horumarka ku soo kordha, iyada oo sawir laga qaadayo, oo la gelinayo degelka OpenHerbarium.org, sawir kastana lagu qoray taariikhda la qaaday. Habkani waa mid ka mid ah sababta aanu beertan ugu isticmaalayno in aqoonta dhirta Soomaalilaan lagu dhiso.



*Aloe parvidens.* Afaafka Carwada oo isku diyaarinaysa in ay Ubax bixiso.

***Pachnoda iskuulka ……………………..***

Waxa la heley isaga oo quudanaya ubaxa dhirta qodaxda leh ee waaweyn, isaga oo imanaya qiyaastii 11 barqonimo ee maalintii. Kral iyo kooxdiisu waxa ay sheegeen in habeenkii iyo ka hor inta aanu dhulku kululaan subaxii, in doorshaankani uu dhulka isku qariyo, dhirta hoostooda ama ciiddaba. Inta badan waxa weheliya nooc kale oo doorshaan ah oo la yidhaa *Rhabdotis gemelli*

Si aad u caawiso ururka waxa aad booqataa Website-ka: Somaliland Biodiversity.org Waxa kale oo aad bixin kartaa kaalmooyinka ah (In aad abaabusho kooxaha Shinbiraha fiiriya, Haramaha la dagaallama; si ay nooga caawiso fidinta aqoonta).

# *Xoolo-naaxiye* (*Leucaena leucocephala*)

*Axmed Ibrahim Cawaale*



Sawirka waxa leh [Francisco Manuel Blanco in *Flora de Filipinas*]

*Leucaena leucocephala* waa geed gaab ama geed noqda 2-10 m dherer ahaan. Soomaalilaan waxa la keenay 1970-kii, si uu calaf u noqdo iyo in dabaylaha lagula tacaalo. Inta badan waxa la soo bandhigay in uu yahay geed xoolaha lagu naaxin karo. Magaciisa Soomaaliga ah ee 'Xoolo-naaxiye' ayaa arrintaa sii fidiyey.

*Leucaena leucocephala* wuxu leeyahay faa'idooyin badan oo muuqda. Tusaale ahaan, waa geed Nitrogen-ta soo qabta, isla markaana leh calaf borotiin leh. Sidaas oo ay tahay haddana waxa lagu tiryaa in uu ka mid yahay boqolka geed-harame ee dunida ugu daran. Wuxu bixiyaa siidh badan, dib ayuu u baxaa marka la gooyo, wuxu xiddidada ka soo daayaa Kimiko la dagaallanta dhirta kale in aanay bixin, wuxuna si degdeg ah u saldhigtaa meelaha biyo mareennada ah, ee ama dabiiciga ah ama jidadka hareerihiisa ah. Siidhkiisa waxa fidiya shinbiraha ama xoolaha daaqaya. Marka uu baxo ee uu si qoto leh u istaago wuxu Meesha ka saaraa dhammaan dhirta kale.

Geedkan waxa geeska galbeed ee Koonfurta Afrika looga aqoonsaday mid khatar ah oo mamnuuc ah, waayo ma laha wax faa'ido dhaqaale ah wuxuna leeyahay astaamo khatar ku ah dadka, duunyada iyo deegaankaba. Gobollada kale ee koonfur Afrika waxa looga aqoonsaday heerka labaad ee dhanka haramaha, oo la macno ah in uu leeyahay waxoogaa faa'ido ah oo loo beeri karo xaalado cayiman oo la xakamaynayo.

Guud ahaan, duullimaadka *Leucaena leucocephala* ee Soomaaliilaand waxa xakameeya riyaha iyo xoolaha kale ee daaqa. Dhibtu se waa marka uu geedku u gudbo meelaha aanay joogin xoolaha cunaa, markaas oo uu noqdo mushkilad ay adag tahay in la xakameeyo.

Xayndaabka jaamacadda Hargeysa ayaa tusaale fiican u ah awoodda geedkan uu ku fidi karo marka aan la daaqin. Dhowr gu' ka hor, waxa gudaha Jaamacadda loo oggolaaday in ay daaqaan tiro riyo ah iyo dhowr diin. Intii ay riyuhu joogeen, waa ay xakameeyeen geedkan fiditaankiisa. Se markii riyihii meesha laga saaray imika durba qaar baa gaadhay dherer ahaan 3 m oo siidh bixiyey.




*Leucaena leucophala, Barxadda Jaamacadd Hargeysa.* April 2019.



# Booqasho Daraasadeeddii Carwada Qaran ee Nayroobi

*Faysal Jaamac Geelle*




Carwada qaran ee Nayroobi waa mid ka mid ah carwooyinka ugu waaweyn bariga Afrika. Waxa la bilaabay 1910-kii markii xubnaha bariga Afrika iyo ururkii taariikhda dabiiciga ah ee Yugaandha ay dooneen meel ay ku kaydiyaan muunadaha. Waxa loo soo raray halka ay imika ku taallo 1930-kii. Dhawr jeer ayaa dib loo cusboonaysiiyey, oo markii ugu danbaysay ahayd 2005-tii.



Specimen cabinets, East African Herbarium

Xarunta dhirta ee bariga Afrika oo imika ka tirsan carwada qaran ee Kiiniya, xitaa way ka da' weyn tahay carwada lafteeda oo waxa la bilaabay 1902-dii. Taas oo ka dhigaysa mid ka mid ah kuwa ugu da' weyn Afrika. Waxa ay sidoo kale hoy u tahay muunadaha dhirta ee ugu badan ee Afrikada kulaalayaasha, halkaas oo ay 700,000 oo muunadood iyo macluumaadkii wehelinayey ku kaydsan yihiin iyo weliba laybreeri hodan ku ah macluumaadka gobolka.

Macluumaadka baahsan ee xarunta yaalla ayaa ka dhigaya in ay noqoto xarun daraasadeed oo qaran iyo mid gobol oo ay ku soo hirtaan culimada dhirtu. Muunadaha dhiroonka ee yaalla waxa ka mid ah kuwa Soomaalilaan laga keenay, kuwaas oo badankooda la soo ururiyey xilliyadii maxmiyaddii Ingiriiska.

Noofember 2018, Mary Barkworth iyo Faysal Geelle ayaa booqday xarunta, safar la xidhiidha daraasaddii dacarta cas. Ujeeddadu waxa ay ahayd in jaadka dacartaas hore loogu magac bixiyey iyo in kale. Si taas loo hubiyo waxa ay eegeen boqollaalka muunadood ee dacartii Meesha taallay, si loo xaqiijiyo wax la jaad ah oo Meesha yaalla. Midna la ma mid ahayn. Baadhitaankan iyo weliba baadhitaankii muuqaalladii ka badnaa 640-ka sawir ee Royal Botanical Gardens, Kew, iyo in ka badan 200 oo muunadood ee Missouri Botanical Garden, iyo sharaxaaddii in ka badan 500 oo dacarood ee buugga: *: the definitive guide* (Carter et al. 2011) waxa ay saamaxeen in la qanciyo hubiyeyaashii qoraalka cilmi ee ay diyaariyeen Barkworth, Cawaale iyo Geelle (2019), oo si rasmi ah ugu magac bixiyey dacarta cas oo noqotay mid u qalanta in loo aqoonsado jaad cusub.

Intii ay halkaa ku sugnaayeen, Barkworth iyo Geelle waxa ay la dhaceen sida diirran ee loo qaabilay waxana ay isla garteen in ay xidhiidh dhaw la yeeshaan xarunta dhiroonka. Si gaar ah waxa uga soo baxay qorshe ah in Geelle uu ku qaato xarunta 3 bilood oo tababar ah sannadka 2019. Sidoo kale waxa xarunta ay guddoonsiiyeen nuqul ka mid ah buugga "Introduction to plants in Central Somaliland" ee ay wada qoreen Helen Pickering and Axmed I. Cawaale.



Faysal iyo xubno ka tirsan Xarunta dhiroonka ee Bariga Africa. Ka bilaw Bidix: Kennedy Matheka, Judith Nyamai, Dr. Mutuku Musili Iyo Faysal Jaamac Geelle.

# Wararka Xarunta

***Deeq ka timid xarunta daraasaadka dhirta udugga leh.***

Bishii May, Hay'adda kala-duwanaanshaha Noolaha Soomaalilaan wuxu deeq dhan $27,000 ka heley Aromatic Plant Research Center (xarunta daraasaadka dhirta udugga leh), si loo dardar geliyo ku wacyigelinta dhanka muhiimadda beeyada iyo isticmaalkeeda waari kara. Hay'addu waxay la shaqayn doontaa Anjanette DeCarlo, agaasimaha mashruuca Cal Madaw, iyo kooxdeeda sidii loo horumarin lahaa khayraadka iyo weliba tababarro ah sidii loogu xidhi lahaa Soomaalida geedkaas laga hadlayo.

*Wada shaqaynta dhaw ee Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Miyiga.*



Minister Shukri visits the mu-

Gu'gan wasiir Shukri, Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Miyiga iyo xubno agaasinka SBF waxa ay booqdeen xarunta kala duwaanshaha noolaha. Wasiirku waxa ay weydiisay weydiimo badan oo la xidhiidha hawlaha xarunta iyo waxa lagu soo bandhigo.

Maalintii xigtay Mary Barkworth iyo Faysal oo tirsan howlwadeennada Xarunta SBF waxa ay la kulmeen wasiirka iyo xubno ka socda waaxda kaymaha iyo daaqa si ay u lafo guraan habka loo sii ballaadhin lahaa wada shaqaynta ururka SBF iyo Wasaaraddu. Dhammaan waxa la isla gartay in si dhaw loo wada shaqeeyo mustaqbalka dhaw. Taasi waxa ay keenaysaa in xaruntu wax ka barato hawl wadeennada wasaaradda, dhanka kalena ay xaruntu ka taageerto wasaaradda sidii loo soo ururin lahaa muunado badan, sidii loo wadaagi lahaa macluumaadka la xidhiidha kala duwanaanshaha noolaha, iyo sidii wadajir loogu soo saari lahaa xog-side ku qoran afka ingiriisida iyo Soomaaliga oo ku saabsan dhirta iyo xayawaanka Soomaalilaan.

*Ka mid noqoshada xog bixiyeyaasha 'fududeynta macluumaadka kala duwanaanshaha noolaha dunida' - Global Biodiversity Information Facility (GBIF).*

Xarunta dhiroonka (HARG) imika waxa ay bixisaa xogta kaydka muunadaheeda oo waxa ay la wadaagtaa Global Biodiversity Information Facility (GBIF), kuwaas oo xogta ka hela machadyada iyo ururrada dunida si fududna xogta ugu sii gudbiya cilmi-baadhayaasha dunida. HARG waa xaruntii koowaad ee Bariga Afrika ee macluumaadkeeda la wadaagta GBIF.

*Horumar wadajir ah*

Xarunta kala duwanaanshaha noolaha ee Jaamacadda Hargeysa imika waxa ay hoy u tahay laba muunadood oo asal ah oo labadaba la sharraxay 2019: *Aloe sanguinalis,* oo loo yaqaan Dacar Cas *iyo Boswellia occulta,* oo gudaha looga yaqaan *Moxor Madaw.* Waa labadii asal-muunadeed ee ugu horreeyey ee ay Soomaalilaan hoy u noqoto.

Muunad-asaleedku waa muunado si gaar ah muhiim u ah waayo waxa ay dejiyaan macnaha magaca. Waxa laga yaabaa in uu dhawr muunadood yeelan karo jaadkaasi, laakiin waxa jira keliya muunad qudha oo asal ah.



Beerta dhirta dheecaanka leh ee xaruntu imika waxa ay haysaa 30 jaad oo kala duwan. Ujeeddada beertan dhirta dheecaanka leh waa sidii wax badan looga baran lahaa nolosha jaadadkan la beeray.

Laba geed, oo labaduba ka tirsan bahda *Apocynaceae*, ayaa ubax bixiyey dabayaaqadii February, *Edithcolea grandis* and *Echidnopsis dammanniana.* Midkoodna weli wax siidh ah ma bixin, oo la macno ah in ay u baahan yihiin faxleyaal ka hor inta aanay siidh bixin.

## Nagala Soo Xidhiidh

Web Site: http://Somalilandbiodiversity.org

Email: mary.barkworth@usu.edu

Mailing Address:

Somaliland Biodiversity Foundation

397 Lauralin Drive

Logan, UT 84321